108. Waxaad Dhahdaa waxaa uun lay Waxyooday Aniga in Ilaaheennu Ilaah kaliya yahay ee Idinku Muslimiin ma Tihiin (Ma Hogaansameysaan).

قُلْ إِنَّمَا يُوحَىٰٓ إِلَيَّ أَنَّمَآ إِلَٰهُكُمْ
إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ فَهَلْ أَنتُم مُّسْلِمُونَ ١٠٨

109. Haddayse Jeedsadaan waxaad Dhahdaa waxaan idin Ogaysiiyey si Siman (Cad) Colnimo Mana Ogi inay Dhawdahay ama Fogtahay waxa laydiin Yaboohay.

فَإِن تَوَلَّوْا فَقُلْ ءَاذَنتُكُمْ عَلَىٰ سَوَآءٍ
وَإِنْ أَدْرِىٓ أَقَرِيبٌ أَم بَعِيدٌ مَّا تُوعَدُونَ ١٠٩

110. Eebe wuxuu Ogyahay waxa lala Qaylyo oo Hadala wuxuuna Ogyahay waxaad Qarinaysaan.

إِنَّهُۥ يَعْلَمُ ٱلْجَهْرَ مِنَ ٱلْقَوْلِ وَيَعْلَمُ
مَا تَكْتُمُونَ ١١٠

111. Mana Ogi waxay u Dhawdahay inay Fidmo idiintahay iyo Raaxo Tan iyo Muddo.

وَإِنْ أَدْرِى لَعَلَّهُۥ فِتْنَةٌ لَّكُمْ وَمَتَٰعٌ إِلَىٰ حِينٍ ١١١

112. Wuxuu yidhi (Nabigu) Eebow ku kala Xukun (Dhexdanada) Xaq, Eebahanana waa Raxmaan ee Looga Kaalmo waydiisto waxaad Sheegaysaan.

قَٰلَ رَبِّ ٱحْكُم بِٱلْحَقِّ ۗ وَرَبُّنَا ٱلرَّحْمَٰنُ ٱلْمُسْتَعَانُ
عَلَىٰ مَا تَصِفُونَ ١١٢

**Eebe waa Kali,Isagayna waajibtahay in Loo Hogaansamo, Ciddiise Jeedsata ha Ogaato si Cad inay Eebe iyo Rasuulkiisa la Colloowday,Kolleyna waa kii Gaalo la Ciqaabo ama ha Dhawaato ama ha Dib Dhacdo Muddee, Eebana waa Ogyahay wax kasta ama Ha la Muujiyo ama Ha la Qarsadee, Dib u Dhigidda Ciqaabtuna waxaa Suurowda inay tahay Imtixaam iyo u Raaxayn Muddo.**
**Eebana isagaa ah Xaakimka Caadilka ah, Sharcigiisaana Caadil ah, Isagaana looga Kaalmo waydiistaa Dhibaatada iyo waxay Gaaladu Sheegi oo Xumaan ah. Nabiga iyo Nabiyadii kalaba Nabadgalyo Eebe korkooda ha yeelee waxay Dhihi jireen Eebow Cadaalo nagu kala Xukun Anaga iyo Qoomkanaga. Al-Anbiyaa' (108-112).**

## Suurat Al-Xajj سُورَةُ الْحَجِّ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Dadaw ka Dhawrsada Eebihiin Maxaayeelay Gilgilashada Saacadda (Qiyaame) waa wax wayn (Daran).

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱتَّقُوا۟ رَبَّكُمْ ۚ إِنَّ زَلْزَلَةَ
ٱلسَّاعَةِ شَىْءٌ عَظِيمٌ ١

2. Waana Maalintaad Arkaysaan Iyadooy Halmaami Mid wax Nuujisa

يَوْمَ تَرَوْنَهَا تَذْهَلُ كُلُّ مُرْضِعَةٍ عَمَّآ

Dhammaanteed waxay Nuujinaysay, ooy Dejin (Tuuri) mid Kastoo Uur leh Uurkeeda, waxaadna Arkaysaa Dadkoo Waalan, mana aha kuwo (dhab) u Waalan ee Cadaabka Eebaa Daran.

أَرْضَعَتْ وَتَضَعُ كُلُّ ذَاتِ حَمْلٍ حَمْلَهَا
وَتَرَى ٱلنَّاسَ سُكَٰرَىٰ وَمَا هُم بِسُكَٰرَىٰ
وَلَٰكِنَّ عَذَابَ ٱللَّهِ شَدِيدٌ ﴿٢﴾

3. Dadka waxaa ka mid ah Ruux ku Murmi Eebe Cilmi la'aan oo raaci Shaydaan kastoo Madax Adag.

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يُجَٰدِلُ فِي ٱللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ
وَيَتَّبِعُ كُلَّ شَيْطَٰنٍ مَّرِيدٍ ﴿٣﴾

4. Waxa loo Qoray (Shaydaan) Ruuxii Talada u Dhiibta (Raaca) inuu Baadiyeeyo kuna Toosiyo Cadaabka

كُتِبَ عَلَيْهِ أَنَّهُۥ مَن تَوَلَّاهُ فَأَنَّهُۥ يُضِلُّهُۥ
وَيَهْدِيهِ إِلَىٰ عَذَابِ ٱلسَّعِيرِ ﴿٤﴾

**Suurraddan waxaa lagu Magacaabaa Suuradda Xajka, Maxaayeelay waxay ka Warrantay Xajka iyo waxa la Xidhiidha, waxayna ku Billaabatay Shiddada Qiyaamada iyo inay Dadku ka Dhawrsadaan Dhibaatadaas, waxaana looga Dhawrsan Camal Fiican, Dadkuna Maalintaas waxay la Kulmi Arrin wayn inta laga Moodo inay Waalanyihiin iyagoon Waallayn ee waa uun Dhibka, wixii Ilma ah oo Lanuujinhaya ama Uurka ku jirayna la Tuuro, Tan kale ma Haboona in Cilmi Darro lagu Doodo Eebe iyo Diinta, lana Raaco Shaydaan wax Dhumiya, Naartana u Hogaamiya.**
**Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Waxaa laydin Soo kulmin Qiyaamada idinkoo Kaba La' oo Qaawan, oon Gudnayn, Caa'isha waxay Tidhi: Rasuulka Eebow Ragga iyo Haweenku mays Dhawri! Markaasuu Yidhi: Nabigu Caa'ishoy Xaalku waa ka Daranyahay in waxaasi Shuqliyo. Taasina waxay ku Tusin Dhibaatada Qiyaamada. Al-Xajj (1-4).**

---

5. Dadow haddaad Tihiin kuwo Shakisan soo Bixinta Annagaa idinka Abuuray Carro, Haddana, Dhibic Haddana Calaqo, Haddana Goosin la Abuuray iyo Midaan la Abuurin si aan idiinku Caddayno (Qudrada Eebe) waxaana ku sugnaa Makaanka waxaan Doono Tan iyo Muddo Magacaaban, markaasaan idin soo Bixinaynaa Idinkoo Yar, markaas inaad Gaadhaan Xooggiinna: waxaa idinka mid ah Cid la oofsan (Dhiman) waxaana idinka mid ah kuwo loo celin Cimri Liita (Gabow) si ayna u Garanin intay wax Yaqiineen ka dib waxba, waxaad Arkaysaa Dhulkoo Abaar (Dhimaad) ah markaan ku soo Dejinno Korkeeda Biyana way Gilgilataa wayna Kortaa, waxayna soo Bixisaa Nooc kastoo Quruxsan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِن كُنتُمْ فِي رَيْبٍ مِّنَ ٱلْبَعْثِ فَإِنَّا
خَلَقْنَٰكُم مِّن تُرَابٍ ثُمَّ مِن نُّطْفَةٍ ثُمَّ مِنْ عَلَقَةٍ
ثُمَّ مِن مُّضْغَةٍ مُّخَلَّقَةٍ وَغَيْرِ مُخَلَّقَةٍ لِّنُبَيِّنَ لَكُمْ
وَنُقِرُّ فِي ٱلْأَرْحَامِ مَا نَشَآءُ إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى
ثُمَّ نُخْرِجُكُمْ طِفْلًا ثُمَّ لِتَبْلُغُوٓا۟ أَشُدَّكُمْ
وَمِنكُم مَّن يُتَوَفَّىٰ وَمِنكُم مَّن يُرَدُّ
إِلَىٰٓ أَرْذَلِ ٱلْعُمُرِ لِكَيْلَا يَعْلَمَ مِنۢ بَعْدِ عِلْمٍ
شَيْـًٔا وَتَرَى ٱلْأَرْضَ هَامِدَةً فَإِذَآ أَنزَلْنَا عَلَيْهَا
ٱلْمَآءَ ٱهْتَزَّتْ وَرَبَتْ وَأَنۢبَتَتْ
مِن كُلِّ زَوْجٍۭ بَهِيجٍ ﴿٥﴾

6. Taasna waxaa ugu Wacan in Eebe uun Xaq yahay uuna Nooleeyo waxa Dhintay iyo inuu wax walba Karo,

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْحَقُّ وَأَنَّهُۥ يُحْيِ ٱلْمَوْتَىٰ
وَأَنَّهُۥ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٦﴾

7. Iyo in Saacadda Qiyaame iman Shaki la'aan, Eebana wuxuu soo Bixin

وَأَنَّ ٱلسَّاعَةَ ءَاتِيَةٌ لَّا رَيْبَ فِيهَا

waxa Qubuuraha ku Sugan.

وَأَنَّ ٱللَّهَ يَبْعَثُ مَن فِى ٱلْقُبُورِ ﴿٧﴾

Dadka kuma haboona inay diidaan soo Bixinta Maxaayeelay waxay soo mareen Abuurid kala Duwan Laga bilaabo Dhibic Ilaa intay ka Gaboobaan, Arrintaasuna ugu filan Waano, waxaa kaloo Waano ugu Filan Roobka iyo Dooguu soo Bixiyo Abaar ka Dib, Taasina waxay Sugi Awoodda Eebe iyo Xaqnimadiisa iyo in Qiyaamadu Imaan Shaki la‘aan iyo Eebe inuu soo Bixin waxa Dhintay. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Abuuridda Midkiin waxaa lagu Kulmiyaa Uurka Hooyadii Afartan Dhibic, markaas Xinjir in la Mid ah, haddana Goosin Sidoo kale, markaas Malag loo Bixiyaa waxaana la Faraa Afar Kalimo waxaana la Qoraa Rizqigiisa, Camalkiisa, Ajashiisa Xuman iyo Liibaan, markaasaa lagu Afuufaa Ruuxda. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim.

Taasina waxay ku Tusin in Dadaal Fiican la dadaalo iyadoo la Ogyahay in Eebe wax walba Qaddaray. Al-Xajj (5-7).

---

8. Dadka waxaa ka mid ah mid ku Doodi Eebe Cilmi La‘aan iyo Hanuun La‘aan iyo Kitaab wax Nuurin la‘aantiis.

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يُجَٰدِلُ فِى ٱللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ وَلَا هُدًى وَلَا كِتَٰبٍ مُّنِيرٍ ﴿٨﴾

9. oo Dadbi Luqunta (Iskibrin) inuu ka Dhumiyo Jidka Eebe, wuxuu Mudan Adduunyada Dulli waxaana Dhadhansiin Maalinta Qiyaame Cadaab wax Guba.

ثَانِىَ عِطْفِهِۦ لِيُضِلَّ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۖ لَهُۥ فِى ٱلدُّنْيَا خِزْىٌ ۖ وَنُذِيقُهُۥ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ عَذَابَ ٱلْحَرِيقِ ﴿٩﴾

10. Taasna waa waxay Hor marsatay Gacmahaagu, Eebana ma aha Dulmiyaha Addoomada.

ذَٰلِكَ بِمَا قَدَّمَتْ يَدَاكَ وَأَنَّ ٱللَّهَ لَيْسَ بِظَلَّٰمٍ لِّلْعَبِيدِ ﴿١٠﴾

11. Waxaa ka mid ah Dadka mid u Caabudi (Eebe) Dhinac (Shaki) Hadduu soo Gaadho Khayra Xasili, Hadduu soo Gaadho Imtixaan (Dhibna) u Gadooma Wajigiisa (Gaalooba) wuxuu Khasaariyey Adduun iyo Aakhiraba Kaasina waa Khasaaraha Cad uun.

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يَعْبُدُ ٱللَّهَ عَلَىٰ حَرْفٍ ۖ فَإِنْ أَصَابَهُۥ خَيْرٌ ٱطْمَأَنَّ بِهِۦ ۖ وَإِنْ أَصَابَتْهُ فِتْنَةٌ ٱنقَلَبَ عَلَىٰ وَجْهِهِۦ خَسِرَ ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةَ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلْخُسْرَانُ ٱلْمُبِينُ ﴿١١﴾

12. Wuxuu Caabudi (Baryina) Eebe ka Sokow waxaan Dhibayn Anfacaynna Kaasina waa uun Baadida Fog.

يَدْعُوا۟ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَضُرُّهُۥ وَمَا لَا يَنفَعُهُۥ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلضَّلَٰلُ ٱلْبَعِيدُ ﴿١٢﴾

13. Wuxuu Caabudi wax Dhibkiisu ka Dhawyahay Nacfigiisu, isagaa u Xun Sokeeye una Xun la noolaadi.

يَدْعُوا۟ لَمَن ضَرُّهُۥٓ أَقْرَبُ مِن نَّفْعِهِۦ ۚ لَبِئْسَ ٱلْمَوْلَىٰ وَلَبِئْسَ ٱلْعَشِيرُ ﴿١٣﴾

Waxaa ka mid ah Dadka kuwo ku Murmi Ilaahay Cilmi iyo Hanuun iyo Kitaab Cad La‘aantiis, ee Kibir iyo Iska weyni uun la Jooga, inay Dadka Xaqa ka Leexiyaan, kuwaasuna waxay mudan Dulli Adduun iyo cadaab Aakhiro, lamana Dulmiyin ee waa waxay hor marsatay Gacantiisu, waxaa kaloo ka mid ah kuwa Eebe u Caabudi dhinac oo Hadduu Khayr Helana Xasila, Haddii Dhib ku Yimaadana Gaalooba, Kaasina waa mid iska Khasaariyey Adduun iyo Aakhiraba, waana Khasaaraha Dhabta ah, wuxuuna Caabudi Eebe ka Sokow waxaan waxba Tarayn, dhibkiisuna ku Dhawyahay Nacfigiisa, kaasaana u Xun Sokeeye iyo Cashiir. Ibnu Cabbaas wuxuu Sheegay in Baadiyihii Carbeed markay Khayr Helaanna Dhihi Jireen waa Diin Fiican marka Dhib ku Yimaaddana Dhihi Jireen waa Diin Xun Markaasaa Eebe soo Dejiyey Aayadahan, Diintuna waa uun Xaq, ama Barwaaqo ha timaaddo ama Dhib ha yimaadee. Al-Xajj (8-13).

14. Ilaahay wuxuu Galiyaa kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo Falay Camal Fiican Jannooyin ay Socoto Dhexdeeda Wabiyaal, Eebana wuxuu Falaa wuxuu Doono.

إِنَّ ٱللَّهَ يُدْخِلُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ
يَفْعَلُ مَا يُرِيدُ ﴿١٤﴾

15. Ciddii u Malayn Inuusan u Gargaarayn Eebe Nabigiisa Adduun iyo Aakhiraba ha u Fidiyo Xadhig Xagga Samada hana isku Gooyo (Marjiyo) hana dayo inay Dhagartiisu Tegsiiso waxa Cadho Galin.

مَن كَانَ يَظُنُّ أَن لَّن يَنصُرَهُ ٱللَّهُ فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةِ
فَلْيَمْدُدْ بِسَبَبٍ إِلَى ٱلسَّمَآءِ ثُمَّ لْيَقْطَعْ فَلْيَنظُرْ
هَلْ يُذْهِبَنَّ كَيْدُهُۥ مَا يَغِيظُ ﴿١٥﴾

16. Saasaana kuugu soo Dejinay Aayaad Cad Eebana wuxuu Hanuuniyaa Cidduu Doono.

وَكَذَٰلِكَ أَنزَلْنَٰهُ ءَايَٰتٍۭ بَيِّنَٰتٍ
وَأَنَّ ٱللَّهَ يَهْدِى مَن يُرِيدُ ﴿١٦﴾

17. Kuwa Rumeeyey (Xaqa) iyo Kuwa Yuhuudoobay iyo Saabi'inta (Xiddigaha Caabuda) iyo Nasaarada iyo Majuusiga iyo Mushrikiinta Eebaa kala bixin Dhexdooda Maalinta Qiyaame, Eebana wax kasta wuu Arkaa.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَٱلَّذِينَ هَادُوا۟ وَٱلصَّٰبِـِٔينَ
وَٱلنَّصَٰرَىٰ وَٱلْمَجُوسَ وَٱلَّذِينَ أَشْرَكُوٓا۟
إِنَّ ٱللَّهَ يَفْصِلُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ
عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ شَهِيدٌ ﴿١٧﴾

18. Miyaadan Arkayn inay Eebe u Sujuudi waxa Samooyinka iyo Dhulka iyo Qorraxda iyo Dayaxa iyo Xidigaha iyo Buuraha iyo Geedaha iyo Xayawaanka iyo Waxbadan oo Dadka ah, wax badanna waxaa ku sugnaaday Korkooda Cadaab, Ruuxuu Ihaaneeyo Eebana ma laha wax Sharrifi,Eebana wuxuu Falaa wuxuu Doono.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ يَسْجُدُ لَهُۥ مَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَمَن فِى ٱلْأَرْضِ وَٱلشَّمْسُ وَٱلْقَمَرُ وَٱلنُّجُومُ وَٱلْجِبَالُ
وَٱلشَّجَرُ وَٱلدَّوَآبُّ وَكَثِيرٌ مِّنَ ٱلنَّاسِ ۖ
وَكَثِيرٌ حَقَّ عَلَيْهِ ٱلْعَذَابُ ۗ وَمَن يُهِنِ ٱللَّهُ فَمَا لَهُۥ
مِن مُّكْرِمٍ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ يَفْعَلُ مَا يَشَآءُ ۩ ﴿١٨﴾

Ciddii Wanaag fasha waxaa lagu Abaal marin Wanaag, Ciddiise u malayn Nabiga inaan Eebe u Gargaarayn Adduun iyo Aakhiraba hadduu Doono Cadho ha u Dhinto Bal inay wax u tarto, Eebana Quraan Cad yuu soo Dejiyey,Eebaana Hanuuniya Cidduu Doono, Dhammaanna Muslim iyo Gaalo Eebaa kala Bixin Qiyaamada, wax kastana Ilaahay Buu u Sujuudaa, oo u Khushuucaa una Hogaansamaa, Sujuudduna ma aha Tan Dadkoo kale ee wax kasta wuxuu u sujuudaa si ku Habboon, waxaana Sugnaatay in Shaydaanku Qoomamayn markuu Galo Naarta,Mu‘miniintuna Jannada oo Sheegi inuu Khasaaray markuu Diiday Sujuudda. Waxayna ku Tusin in Ciddii Sujuudi wayda ay Raacday Sheydaan kana Leexatay Jidka Toosan. Al-Xajj (14-18).

---

19. Labadani waa Doodayaal,waxayna ku Doodeen Eebahood, kuwa Gaaloobay waxaa loo Goyn Maryo Naar ah waxaana Lagu Shubi Korkooda Biyo Kulul.

۞ هَٰذَانِ خَصْمَانِ ٱخْتَصَمُوا۟ فِى رَبِّهِمْ ۖ فَٱلَّذِينَ
كَفَرُوا۟ قُطِّعَتْ لَهُمْ ثِيَابٌ مِّن نَّارٍ يُصَبُّ
مِن فَوْقِ رُءُوسِهِمُ ٱلْحَمِيمُ ﴿١٩﴾

20. Waxaana lagu Gubaa (Lagu Dhalaaliyaa) waxa Caloosha ku Jira iyo Jidhka (Haraga).

يُصْهَرُ بِهِۦ مَا فِى بُطُونِهِمْ وَٱلْجُلُودُ ﴿٢٠﴾

21. waxay Mudan Budhadh Bir ah.

وَلَهُم مَّقَٰمِعُ مِنْ حَدِيدٍ ﴿٢١﴾

22. Markastooy Doonaan inay ka Baxaan Xaggeeda Walbahaar Dartiis waa lagu Celiyaa Dhexdeeda (waxaana la Dhahaa) Dhadhamiya Cadaabka Gubidda.

كُلَّمَآ أَرَادُوٓا۟ أَن يَخْرُجُوا۟ مِنْهَا مِنْ غَمٍّ
أُعِيدُوا۟ فِيهَا وَذُوقُوا۟ عَذَابَ ٱلْحَرِيقِ ﴿٢٢﴾

23. Eebana wuxuu Galiyaa kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo Fala Camal Fiican Jannooyin ay Dureeri Dhexdeeda Wabiyaal, waxaana, Loogu Xidhaa Dhexdeeda Jinjimo Dahab ah iyo Jawhar, Dharkooduna Dhexdeeda waa Xariir.

إِنَّ ٱللَّهَ يُدْخِلُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟
ٱلصَّٰلِحَٰتِ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ
يُحَلَّوْنَ فِيهَا مِنْ أَسَاوِرَ مِن ذَهَبٍ وَلُؤْلُؤًا
وَلِبَاسُهُمْ فِيهَا حَرِيرٌ ﴿٢٣﴾

24. Waxaana lagu Hanuuniyey Wanaagga Hadalka waxaana lagu Hanuuniyey Jidka la Mahdiyo.

وَهُدُوٓا۟ إِلَى ٱلطَّيِّبِ مِنَ ٱلْقَوْلِ وَهُدُوٓا۟
إِلَىٰ صِرَٰطِ ٱلْحَمِيدِ ﴿٢٤﴾

25. kuwa Gaaloobay oo ka Celiya Jidka Eebe iyo Masaajidka Xurmaysan ee looga Yeelay Dadka Sinnaan mid ku Nagi iyo mid Meel ka yimidba ciddii la Doonta Dhexdiisa Leexin Dulmi ah (Xumaan) waxaannu Dhadhansiin Cadaab Daran.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ
وَٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ ٱلَّذِى جَعَلْنَٰهُ لِلنَّاسِ سَوَآءً
ٱلْعَٰكِفُ فِيهِ وَٱلْبَادِ وَمَن يُرِدْ فِيهِ
بِإِلْحَادٍۭ بِظُلْمٍ نُّذِقْهُ مِنْ عَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٢٥﴾

Kuwa Xaqa ku socda iyo kuwa Gaalaada ah waa labo Kooxood oo ku Doodi Eebe,markaasaa Eebe Gaalana si darran u Ciqaabi, Mu‘miniintana Janno iyo Wanaag ku Abaal marin,maxaayeelay Wanaagbaa Eebe ku toosiyey, Ciddiise Gaalowda oo ka Celisa Dadka Jidka Eebe iyo Masaajidka Xurmaysan ee Eebe u Simay Mu‘miniinta iyo Ciddii wax Qallooca iyo Dulmi kula Timaadda Dhexdiisa wuxuu ku Abaal marin Cadaab Daran.
Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi:Dulmigaas waa inaad ku Bannaysataa Xaramka wax lagaa Reebay oo Xumaan ah ama Dil Xaq Darro. Ciddii Saas Fashana waxay Mudan Cadaab Daran. Al-Xajj (19-25).

---

26. (Xusuuso) markaan u Muujinay Nabi Ibraahim Meeja Baytka (Kacbada)Annagoo ku Dhihi Ha la Wadaajin Eebe (Cibaadada) waxba,u Daahirina Gurigayga kuwa Dhawaafi iyo kuwa Taagan iyo kuwa ku Rukuucsan ee Sujuudsan.

وَإِذْ بَوَّأْنَا لِإِبْرَٰهِيمَ مَكَانَ ٱلْبَيْتِ أَن
لَّا تُشْرِكْ بِى شَيْـًٔا وَطَهِّرْ بَيْتِىَ لِلطَّآئِفِينَ
وَٱلْقَآئِمِينَ وَٱلرُّكَّعِ ٱلسُّجُودِ ﴿٢٦﴾

27. Ogaysiina Dadka Xajka ha kuu Yimaaddeen iyagoo Lugayn iyo mid Bog Dheer Dhammaanteed oo ka iman Jaha kasta oo Dheer.

وَأَذِّن فِي ٱلنَّاسِ بِٱلْحَجِّ يَأْتُوكَ رِجَالًا وَعَلَىٰ
كُلِّ ضَامِرٍ يَأْتِينَ مِن كُلِّ فَجٍّ عَمِيقٍ ﴿٢٧﴾

28. inay Joogaan (u yimaadaan) Nacfigooda Dartiis, oy xusaan Magaca Eebe Maalmo la Yaqaan,waxa Eebe ku Arzaaqay oo ah Xayawaanka nicmoolayda, ka Cuna Xaggeeda Quudiyana kan Dhibaataysan ee Faqiirka ah.

لِّيَشْهَدُوا۟ مَنَٰفِعَ لَهُمْ وَيَذْكُرُوا۟ ٱسْمَ ٱللَّهِ
فِىٓ أَيَّامٍ مَّعْلُومَٰتٍ عَلَىٰ مَا رَزَقَهُم مِّنۢ بَهِيمَةِ
ٱلْأَنْعَٰمِ فَكُلُوا۟ مِنْهَا وَأَطْعِمُوا۟
ٱلْبَآئِسَ ٱلْفَقِيرَ ﴿٢٨﴾

29. markaas ha Dhammeeyeen basaastooda,hana Oofiyeen nadorkooda,hana Dhawaafeen Baydka Horreeyey.

ثُمَّ لْيَقْضُوا۟ تَفَثَهُمْ وَلْيُوفُوا۟
نُذُورَهُمْ وَلْيَطَّوَّفُوا۟ بِٱلْبَيْتِ ٱلْعَتِيقِ ﴿٢٩﴾

waxaa Eebe Tusiyey-Nabi Ibraahim Kacbada wuuna Dhisay isagoo Faray inuu Gaalimada ka nadiifiyo, dadkana Xajka ugu yeedho, si ay meel kasta uga yimaaddaan, una Helaan Nacfi Adduun iyo mid Aakhiraba, una Xusaan Eebe, Hadiyo Xoola ahna ugu Gawracaan waxna ka Cunaan kana Quudiyaan Masaakiinta iyo kuwa Dhibaataysan, Basaastana iska Bi'iyaan Oofiyaanna nadarka, Dhawaafaanna Baydka horreeyey. Saasaad u Aragtaa in si Daran loo Yimaaddo Maka Xaj iyo Cumro,loogana helaa Wanaag iyo Khayr Adduun iyo Aakhiraba, waana Masaajid Sharaf leh oy Kacbadu ku Taal oy Waajibna tahay in la Weyneeyo, waxaana sugnaatay in Nabigu (Naxariis iyo nabadgalyo Eebbe korkiisa ha yeelee) La warsaday Masaajidkee u Horreeyey Uuna Yidhi (Masaajidka Xurmaysan) lana yidhi Yaa ku Xigay Yidhina (Baytul maqdis),imisaa u Dhaxaysay markii la Yidhina uu Yidhi Afartan Sano. Kacbaduna waa Tan ula Jeedsadaan Muslimiintu Salaadda kuna Tusin Midnimada iyo Sinaanta iyo Isu naxariisashada, waana Sharafta Islaamka iyo Muuqiisa. Al-Xajj (26-29).

---

30. Waa Saas, Ruuxii Wayneeya wuxuu Reebay Eebe Saasaa u Khayrroon Eebihiis Agtiisa, waxaana laydiin banneeyey Nicmoolayda waxa Laydinku akhriyo Mooyee,ee ka Dheeraada Xumaanta ah Sanamyada kana Dheeraada Hadalka Beenta ah.

ذَٰلِكَ وَمَن يُعَظِّمْ حُرُمَٰتِ ٱللَّهِ فَهُوَ خَيْرٌ لَّهُۥ
عِندَ رَبِّهِۦ ۗ وَأُحِلَّتْ لَكُمُ ٱلْأَنْعَٰمُ إِلَّا
مَا يُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ ۖ فَٱجْتَنِبُوا۟ ٱلرِّجْسَ
مِنَ ٱلْأَوْثَٰنِ وَٱجْتَنِبُوا۟ قَوْلَ ٱلزُّورِ ﴿٣٠﴾

31. Idinkoo u Toosan Eebe oon Mushrikiin ahayn, Ruuxii u Shariig yeela Eebe wuxuu la mid yahay mid ka Soo Dhacay Samada oy Dafi Shimbirtu ama ay ku Tuuri Dabaysho Meel Dheer oo halaag ah.

حُنَفَآءَ لِلَّهِ غَيْرَ مُشْرِكِينَ بِهِۦ ۚ وَمَن يُشْرِكْ بِٱللَّهِ فَكَأَنَّمَا
خَرَّ مِنَ ٱلسَّمَآءِ فَتَخْطَفُهُ ٱلطَّيْرُ أَوْ تَهْوِى بِهِ
ٱلرِّيحُ فِى مَكَانٍ سَحِيقٍ ﴿٣١﴾

32. waa Saas Ruuxii wayneeya Amarada Eebe (Sharcigiisa) taasi waa dhawrsashada Quluubta.

ذَٰلِكَ وَمَن يُعَظِّمْ شَعَٰٓئِرَ ٱللَّهِ فَإِنَّهَا
مِن تَقْوَى ٱلْقُلُوبِ ﴿٣٢﴾

33. waxaa idiinku Sugnaaday (hadiyada) Nacfi Tan iyo Muddo,Markaas

لَكُمْ فِيهَا مَنَٰفِعُ إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى

waxay ku Dhammaan Baydka Hor-reeyey.

ثُمَّ مَحِلُّهَآ إِلَى ٱلْبَيْتِ ٱلْعَتِيقِ ٣٣

34. Ummad kasta waxaan u yeellay Cibaado (Ciid) inay ku Xusaan Eebe wuxuu ku Arzaaqay oo Xayawaanka Nicmoolayda ah,Ilaahiinna waa Ilaah kaliya ee u Hogaansama una Bishaaree, kuwa Xasilloon (ee Cabsada) ee ah.

وَلِكُلِّ أُمَّةٍ جَعَلْنَا مَنسَكًا لِّيَذْكُرُوا۟ ٱسْمَ ٱللَّهِ
عَلَىٰ مَا رَزَقَهُم مِّنۢ بَهِيمَةِ ٱلْأَنْعَٰمِ ۗ فَإِلَٰهُكُمْ
إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ فَلَهُۥٓ أَسْلِمُوا۟ ۗ وَبَشِّرِ ٱلْمُخْبِتِينَ ٣٤

35. Kuwa marka la Xuso Eebe ay Cabsato Quluubtoodu,kuna Samra waxa ku Dhaca ee Ooga Salaadda,waxaan ku Arzaaqnayna wax ka Bixiya.

ٱلَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ ٱللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَٱلصَّٰبِرِينَ
عَلَىٰ مَآ أَصَابَهُمْ وَٱلْمُقِيمِى ٱلصَّلَوٰةِ وَمِمَّا
رَزَقْنَٰهُمْ يُنفِقُونَ ٣٥

**Saan soo Sheegnay Suuraddan waxay ka warrami Camalka Xajka, halkanna wuxuu Eebe Fari in la Dhawro Sharcigiisa, lagana Dheeraado Gaalnimada iyo Beenta, Illeen Ciddii Eebe wax la Caabudda waa midday ku Dhacday khasaare waxayna kale oy ka warrami Aayaduhu Hadyada la Gawrici Xajka iyo Habkeeda iyo in Eebe kaliya la Caabudo Loona Hogaansamo Sharcigiisa, kuwaas saas Falana waa kuwa Qalbigoodu Cabsado oo Samra, oo Salaadda Ooga, Zakadana Bixiya, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabad-galyo Eebe Korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Maraga Beenta ah wuxuu la Sinnaaday Eebe wax lala Caabudo, wuxuuna Akhriyey Aayadda. Taasina waxay ku tusin Xumaanta Beenta iyo inay Khatartahay inay kala mid Noqotay Gaalimada. Al-Xajj (30-35).**

---

36. Loogga (Hadyada) waxaan idiinka Yeellay Sharciga Calaamooyinka Eebe waxaana idiinku Sugan Dhex-deeda Khayr ee ku Xusa Magaca Eebe Korkeeda iyadoo Jilib Xidhan, markay U dhacdo Dhinacna wax ka Cuna,kana Quudiya kan Dhawrsoon iyo kan Warsanba, Saasaana idiinka Fududaynaa, inaad Mahdisaan.

وَٱلْبُدْنَ جَعَلْنَٰهَا لَكُم مِّن شَعَٰٓئِرِ ٱللَّهِ لَكُمْ فِيهَا
خَيْرٌ ۖ فَٱذْكُرُوا۟ ٱسْمَ ٱللَّهِ عَلَيْهَا صَوَآفَّ ۖ فَإِذَا وَجَبَتْ
جُنُوبُهَا فَكُلُوا۟ مِنْهَا وَأَطْعِمُوا۟ ٱلْقَانِعَ وَٱلْمُعْتَرَّ ۚ كَذَٰلِكَ
سَخَّرْنَٰهَا لَكُمْ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ٣٦

37. Ma gaadho Eebe Hilibkeedu iyo Dhiiggeedu waxaase Gaadha ka Dhawrsoonidiinna,Saasaana Eebe idiinku Fududeeyaa inaad ku Waynaysaan wuxuu idinku Hanuuniyey una Bishaaree kuwa Wanaagga Fala.

لَن يَنَالَ ٱللَّهَ لُحُومُهَا وَلَا دِمَآؤُهَا وَلَٰكِن يَنَالُهُ
ٱلتَّقْوَىٰ مِنكُمْ ۚ كَذَٰلِكَ سَخَّرَهَا لَكُمْ لِتُكَبِّرُوا۟
ٱللَّهَ عَلَىٰ مَا هَدَىٰكُمْ ۗ وَبَشِّرِ ٱلْمُحْسِنِينَ ٣٧

38. Eebana wuu Daafacaa kuwa Rumeeyey (Xaqa) Eebana ma Jecla mid kastoo Khayaamo Badan oo Gaalimo Badan.

۞ إِنَّ ٱللَّهَ يُدَٰفِعُ عَنِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ
لَا يُحِبُّ كُلَّ خَوَّانٍ كَفُورٍ ٣٨

39. waxaa loo Idmay kuwa lala Dagaallami (inay Dagaallamaan)

أُذِنَ لِلَّذِينَ يُقَٰتَلُونَ بِأَنَّهُمْ ظُلِمُوا۟ ۚ وَإِنَّ ٱللَّهَ

عَلَىٰ نَصۡرِهِمۡ لَقَدِيرٌ ﴿٣٩﴾

maxaayeelay waa la Dulmiyey Eebena Gargaarkooda wuu Karaa.

ٱلَّذِينَ أُخۡرِجُواْ مِن دِيَٰرِهِم بِغَيۡرِ حَقٍّ إِلَّآ أَن
يَقُولُواْ رَبُّنَا ٱللَّهُۗ وَلَوۡلَا دَفۡعُ ٱللَّهِ ٱلنَّاسَ بَعۡضَهُم بِبَعۡضٖ
لَّهُدِّمَتۡ صَوَٰمِعُ وَبِيَعٞ وَصَلَوَٰتٞ وَمَسَٰجِدُ
يُذۡكَرُ فِيهَا ٱسۡمُ ٱللَّهِ كَثِيرٗاۗ وَلَيَنصُرَنَّ
ٱللَّهُ مَن يَنصُرُهُۥٓۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَقَوِيٌّ عَزِيزٌ ﴿٤٠﴾

40. waana kuwa laga Bixiyey Guryahoodii xaq Darro iyo Inay Dheheen Eebahanno waa Ilaahay, haddayna Jirin ku Daaficidda Eebe Dadka Qaarkood Qaar waxaa la Dumin lahaa Macaabidda Yuhuud, iyo Biyac Kaniisadaha, iyo Kaniisadda Dad kale, iyo Masaajidda lagu Xuso Dhexdeeda magaca Eebe wax badan, wuuna u Gargaari Eeebe Cidii u Gargaarta (Diintiisa) Eebana waa Xoog Badane Adkaada.

**Xoolaha Eebaa Noogu Nicmeeyey, Cunno, Cabbid, Rarasho, Korid iyo waxyaalo kale, Hadyana Xajkaa loogu, Qalaa waxaana wax laga siiyaa kuwa Baahan, Ilaahayna Dan kama leh Hilibkeeda iyo Dhiigeeda ee Wuxuu ka AbaalmariyaaWanaagga, Eebaana Daafaca Mu‘miniinta Dhabta ah Loona Idmay inay Dagaallamaan, Illeen waa la dulmiyey oo Xaq Darro looga soo Bixiyey Guryahoodiiye, Haddaan Eebe Mu‘miniinta ku Daaficin Gaaladana waxaa la Dumin lahaa Meelaha lagu Caabudo Eebe. Al-Xajj (36-40).**

---

ٱلَّذِينَ إِن مَّكَّنَّٰهُمۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ أَقَامُواْ ٱلصَّلَوٰةَ
وَءَاتَوُاْ ٱلزَّكَوٰةَ وَأَمَرُواْ بِٱلۡمَعۡرُوفِ
وَنَهَوۡاْ عَنِ ٱلۡمُنكَرِۗ وَلِلَّهِ عَٰقِبَةُ ٱلۡأُمُورِ ﴿٤١﴾

41. waana kuwa Haddaan Makanino Dhulka Ooga Salaadda oo Bixiya Zakada oo Fara Wanaagga oo ka Reeba Xumaanta, Eebaana iskale Cidhibta Arrimaha.

وَإِن يُكَذِّبُوكَ فَقَدۡ كَذَّبَتۡ
قَبۡلَهُمۡ قَوۡمُ نُوحٖ وَعَادٞ وَثَمُودُ ﴿٤٢﴾

42. Hadday ku Beeniyaan waxaa Beeniyey Hortood Qoomkii (Nabi) Nuux iyo Caad iyo Thamuud.

وَقَوۡمُ إِبۡرَٰهِيمَ وَقَوۡمُ لُوطٖ ﴿٤٣﴾

43. iyo Qoomkii (Nabi) Ibraahim iyo Qoomkii (Nabi) Luudh.

وَأَصۡحَٰبُ مَدۡيَنَۖ وَكُذِّبَ مُوسَىٰ فَأَمۡلَيۡتُ
لِلۡكَٰفِرِينَ ثُمَّ أَخَذۡتُهُمۡۖ فَكَيۡفَ
كَانَ نَكِيرِ ﴿٤٤﴾

44. iyo Ehelkii Madyan, waana la Beeniyey (Nabi) Muuse, waana Sugay Gaalada markaasaan Qabtay ee see noqday Ciqaabkii.

فَكَأَيِّن مِّن قَرۡيَةٍ أَهۡلَكۡنَٰهَا وَهِيَ ظَالِمَةٞ
فَهِيَ خَاوِيَةٌ عَلَىٰ عُرُوشِهَا
وَبِئۡرٖ مُّعَطَّلَةٖ وَقَصۡرٖ مَّشِيدٍ ﴿٤٥﴾

45. maxay Badantahay Magaalo aan Halaagnay iyadoo Gardaran iyaduna u Dhacday Darbiyadeedii iyo Ceel la Halleeyey iyo Daar wayn (markii la Halaagay Dadkii).

أَفَلَمۡ يَسِيرُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ فَتَكُونَ لَهُمۡ قُلُوبٞ يَعۡقِلُونَ

46. Miyeyna ku Soconin Dhulka oy u Ahaato Quluub ay wax ku Kasaan ama

Dhago oy wax ku Maqlaan, Indha Beelka Dhabta ahna waa Indho Beelka Quluubta ku Sugan Laabta.

بِهَآ أَوْ ءَاذَانٌ يَسْمَعُونَ بِهَا ۖ فَإِنَّهَا لَا تَعْمَى ٱلْأَبْصَٰرُ
وَلَٰكِن تَعْمَى ٱلْقُلُوبُ ٱلَّتِى فِى ٱلصُّدُورِ ﴿٤٦﴾

Kuwa Eebe u Yaboohay una Gargaaro waa kuwa Niyeysan Hadduu Eebe makaniyo Dhulka ku Maamuli Diinta Eebe iyo Sharcigiisa, oo Dhawri Salaadda, Zakada Wanaag Faridda, Xumaan ka Reebidda, iyo Khayroo Dhan. Kuwaan Saas ahaynse siday ku Mudan Gargaar Eebe, Ciddiise Beenisa Nabiga iyo Xaqa, waxay la mid Noqon kuwii hore ee Beeniyey lana Ciqaabay, Imisaana la Halaagay Magaalo Kibirtay oy Guryihii, Ceelashii iyo Meel kastaba Cidlowday, wayna Arki Kartaa Ciddii marta Dhulka. Indha la‘aanta Dhabta ahna waa Tan Qalbiga mar Haddaan Xaqa, Hanuunka iyo Nuurka Eebe lagu garanayn. Al-Xajj (41-46).

---

47. waxay Dedejisan Cadaab mana Baajinaayo Eebe Yaboohiisa, Maalin Eebe Agtiisana waxay la mid tahay kun Sano oo waxaad Tirinaysaan.

وَيَسْتَعْجِلُونَكَ بِٱلْعَذَابِ وَلَن يُخْلِفَ ٱللَّهُ وَعْدَهُۥ ۚ
وَإِنَّ يَوْمًا عِندَ رَبِّكَ كَأَلْفِ سَنَةٍ
مِّمَّا تَعُدُّونَ ﴿٤٧﴾

48. Badanaa Magaalo aan u Sugnay* iyadoo Daalimad ah,Markaas aan Qabtay Xaggayga Umbaana loo Ahaan.

وَكَأَيِّن مِّن قَرْيَةٍ أَمْلَيْتُ لَهَا وَهِىَ ظَالِمَةٌ
ثُمَّ أَخَذْتُهَا وَإِلَىَّ ٱلْمَصِيرُ ﴿٤٨﴾

49. waxaad Dhahdaa Dadow waxaan uun Anigu idiin ahay Dige Cad.

قُلْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّمَآ أَنَا۠ لَكُمْ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٤٩﴾

50. kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo falay Camal Fiican waxay mudan Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharaf leh (Janno).

فَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَهُم مَّغْفِرَةٌ
وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٥٠﴾

51. kuwa u Socda (Xumaanta) Aayaadkanaga iyo (isku dayi) inay na daaliyaan kuwaasu waa Ehelka Jaxiimo.

وَٱلَّذِينَ سَعَوْا۟ فِىٓ ءَايَٰتِنَا مُعَٰجِزِينَ أُو۟لَٰٓئِكَ
أَصْحَٰبُ ٱلْجَحِيمِ ﴿٥١﴾

Mana Habboona in la soo Dedejisto Ciqaabta Eebe iyo Cadaabkiisa, ILLeen Eebe ma Baajiyo Yaboohiisee, Maalintuna Eebe agtiisa waxay la mid tahay Kun sano oo waxa la Tiriyo ah. waxaana sugnaaday in Nabigu Yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Waxay Gali Fuqarada Muslimiintu Janada ka Hor kuwa Xoolaha leh Maalin Nuskeed Shan Boqol oo Sano cid kastoo la halaagana Eebe umbay la Kulmi oo Abaal marin. Nabiguna waa u Digaha Dadka, Ciddii wanaag Fashana waxay mudan Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharafleh, kuwa Xaqa ka hor imaanna waa Ehelka Naarta. mana Sinna Xumaanle iyo Sama fale xaqa Raaca oo wanaag u horseeda. Al-Xajj (47-51).

* u Kaadinnay.

---

52. Rasuulkastoon Dirray ama Nabi Hortaa,markuu wax Akhrin waxbuu ku Tuuraa Shaydaanku Akhriskiisa,markaasuu Baabi'yaa Eebe wuxuu Tuuri Shaydaanku wuxuuna Sugaa Aayaadkiisa,Eebana waa Ogaade Falsan.

وَمَآ أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ مِن رَّسُولٍ وَلَا نَبِىٍّ إِلَّآ
إِذَا تَمَنَّىٰٓ أَلْقَى ٱلشَّيْطَٰنُ فِىٓ أُمْنِيَّتِهِۦ فَيَنسَخُ ٱللَّهُ
مَا يُلْقِى ٱلشَّيْطَٰنُ ثُمَّ يُحْكِمُ ٱللَّهُ ءَايَٰتِهِۦ ۗ
وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٥٢﴾

53. si uu uga yeelo waxa Shaydaanku Tuuri Fidmo kuwa Quluubtoodu Bugto ee ka Ingagan Quluubta Daalimiintuna waxay ku Suganyihiin Khilaaf (Baadi) Fog.

لِّيَجْعَلَ مَا يُلْقِي ٱلشَّيْطَٰنُ فِتْنَةً لِّلَّذِينَ فِي قُلُوبِهِم
مَّرَضٌ وَٱلْقَاسِيَةِ قُلُوبُهُمْ ۗ وَإِنَّ ٱلظَّٰلِمِينَ
لَفِي شِقَاقٍ بَعِيدٍ ﴿٥٣﴾

54. inay Ogaadaan kuwa Cilmiga la siiyey «Mu‘miniintu» inuu yahay Xaq Eebe ka yimid (Quraanka) oy Rumeeyaan,oy u Khushuucdo Dartiis Quluubtoodu’Eebana wuu ku hanuunin kuwa Rumeeyey (xaqa) Jid Toosan.

وَلِيَعْلَمَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْعِلْمَ أَنَّهُ ٱلْحَقُّ
مِن رَّبِّكَ فَيُؤْمِنُوا۟ بِهِۦ فَتُخْبِتَ لَهُۥ قُلُوبُهُمْ ۗ وَإِنَّ
ٱللَّهَ لَهَادِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٥٤﴾

55. kana tagaan kuwa gaaloobay Shaki intay ugu Timaaddo Saacaddu Kado ama u yimaaddo cadaab Maalin daran.

وَلَا يَزَالُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ فِي مِرْيَةٍ مِّنْهُ حَتَّىٰ تَأْتِيَهُمُ
ٱلسَّاعَةُ بَغْتَةً أَوْ يَأْتِيَهُمْ عَذَابُ يَوْمٍ عَقِيمٍ ﴿٥٥﴾

56. Xukunka Maalintaas Eebaa iska leh,wuuna kala Xukmin Dhexdooda, kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo falay Camal Fiican waxay Gali Janada Naciimo.

ٱلْمُلْكُ يَوْمَئِذٍ لِّلَّهِ يَحْكُمُ بَيْنَهُمْ ۚ
فَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
فِي جَنَّٰتِ ٱلنَّعِيمِ ﴿٥٦﴾

57. kuwa Gaaloobay oo beeniyey Aayaadkanagana kuwaas waxaa u Sugnaaday Cadaab wax Dulleeya.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا فَأُو۟لَٰٓئِكَ
لَهُمْ عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿٥٧﴾

**Qisada kutubta Qaarkeed qorto oo ku Saabsan in Shaydaan Nabiga wax ugu Tuuray intuu Sanamyada Sheego ma aha wax Sugan,waana ka Dhawrsanyahay Nabigu Arrintaas, Hase yeeshee Gaaladaa Shaydaan Moodsiiyey Arrintaas, Eebana Xumaanta wuu Tiraa Xaqana wuu Sugaa, si Cidduu Dhuminna u Muuqato Tii Toosnaanna u Muuqato,iyo inay Mu‘miniintu ogaadaan Xaqa, Jidka ku Toosan, Gaalana Xumaan Madayso intay uga Timaaddo Saacadda ama Ciqaabdaran, Xukunka Qiyaamadana Eebaa iska leh, isagaana kala Xukumi Dhexdooda, kuwa Fiicanna Jannuu Galin kuwa Xunna Naar Daran, Nabiguna waa ka fogyahay inuu Shaydaan u soo Dhawaado. Al-Xajj (52-57).**

---

58. kuwa ku Hijrooday Jidka Eebe Haddana la Dilo ama dhinta wuxuu ku Arzaaqi kuwaas Eebe Rizqi Wanaagsan, Eebana waa ku Khayrroon yahay Rizqigiisu.

وَٱلَّذِينَ هَاجَرُوا۟ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ ثُمَّ قُتِلُوٓا۟
أَوْ مَاتُوا۟ لَيَرْزُقَنَّهُمُ ٱللَّهُ رِزْقًا حَسَنًا ۚ
وَإِنَّ ٱللَّهَ لَهُوَ خَيْرُ ٱلرَّٰزِقِينَ ﴿٥٨﴾

59. wuxuuna Galin Meel ay ka Raalli Noqon (Janno) Eebana waa Oge Dulbadan.

لَيُدْخِلَنَّهُم مُّدْخَلًا يَرْضَوْنَهُۥ ۗ وَإِنَّ ٱللَّهَ
لَعَلِيمٌ حَلِيمٌ ﴿٥٩﴾

60. waa saas,Ruuxii Ciqaaba inta la Ciqaabay oo kale Markaas la garda-

۞ ذَٰلِكَ وَمَنْ عَاقَبَ بِمِثْلِ مَا عُوقِبَ بِهِۦ

raysto wuu u Gargaari Eebe, Eebana waa Cafiye Dhaafa.

ثُمَّ بُغِيَ عَلَيْهِ لَيَنصُرَنَّهُ ٱللَّهُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ
لَعَفُوٌّ غَفُورٌ ٦٠

61. waxaana ugu wacan in Eebe Galiyo Habeenka Maalinta Galiyana Maalinta Habeenka, Eebana waa Maqle Arka.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ يُولِجُ ٱلَّيْلَ فِى ٱلنَّهَارِ
وَيُولِجُ ٱلنَّهَارَ فِى ٱلَّيْلِ وَأَنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌۢ بَصِيرٌ ٦١

62. waxana ugu Wacan Taas in Eebe Xaq (Sugan) yahay, waxay Caabudi oo ka soo Hadhayna Baadil yahay, Eebana yahay Sarreeye Weyn.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْحَقُّ وَأَنَّ مَا يَدْعُونَ
مِن دُونِهِۦ هُوَ ٱلْبَٰطِلُ وَأَنَّ ٱللَّهَ
هُوَ ٱلْعَلِىُّ ٱلْكَبِيرُ ٦٢

Ciddii dar Eebe u Hijroota oo Jahaad lagu Dilo ama iska Dhimata wuxuu Eebe ku Arzaqaa Rizqi Wanaagsan oo ah inuu Galiyo Janno ay ka Raalli noqon. Tan kale Ciddii la Dulmiyo lana Gardaraysto Xaq darro wuu u Gargaari Eebe hadduu Gargaar Muto oo toosanyahay Xaqana ku Joogo, Wuxuu yidhi: Shaxbiil Binu Samdha: Waxaa Dheeraaday Nagaadiganagii Dhulka Ruum markaasuu na maray Salmaan (Al Faarisi) wuxuuna yidhi waxaan maqlay Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) oo leh: Ruuxii Dhinta isagoo Muraabid ah (Gaalada Dhulka ka Dhawri) waxaa u Socon Ajir la Mid ah kaa soo kale, Rizqina waa la siin waxaana laga nabad galin kuwa wax Fidmeeya. Habeenka iyo Maalintana Eebaa iska leh Maamulkooda, waana Eebaha Xaqa ah, waxa la Caabudo ee ka soo hadhayna Baadil yahay waana Sarreeyaha wayn, waana in Eebahaas si Dhab ah loo Caabudo Xagga Caqiidada, Xukunka, Akhlaaqda, Macaamilada, wax walbana lagu Dhaqo Sharcigiisa xaqa ah, ee Caadilka ah. Al-Xajj (58-62).

---

63. Miyeydaan Ogayn in Eebe ka soo Dejiyo Samada Biyo oo ahaado Dhulku Cagaar, Eebana waa Oge Xeel Dheer.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَتُصْبِحُ
ٱلْأَرْضُ مُخْضَرَّةً ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَطِيفٌ خَبِيرٌ ٦٣

64. Waxaa u Sugnaaday Eebe waxa Samaawaadka ku Sugan iyo waxa Dhulka ku Suga, Eebana waa Hodan Mahadsan.

لَّهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۗ
وَإِنَّ ٱللَّهَ لَهُوَ ٱلْغَنِىُّ ٱلْحَمِيدُ ٦٤

65. Miyeydaan ogayn in Eebe idiin Sakhiray waxa ku sugan Dhulka iyo Markabka Socda Badda Dhexdeeda Amarka Eebe, wuxuuna ka Hayaa Samada inay ku dhacdo Dhulka Idinka Eebe mooyee, Eebana Dadka waa u Naxariis badane.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ سَخَّرَ لَكُم مَّا فِى ٱلْأَرْضِ وَٱلْفُلْكَ تَجْرِى
فِى ٱلْبَحْرِ بِأَمْرِهِۦ وَيُمْسِكُ ٱلسَّمَآءَ أَن تَقَعَ
عَلَى ٱلْأَرْضِ إِلَّا بِإِذْنِهِۦٓ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ بِٱلنَّاسِ
لَرَءُوفٌ رَّحِيمٌ ٦٥

66. Eebana waa kan idin Nooleeya, Haddana idin Dila haddana idin Nooleeya Dadkuna waa Diidmo badane (Nicmada Eebe).

وَهُوَ ٱلَّذِىٓ أَحْيَاكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ
ثُمَّ يُحْيِيكُمْ ۗ إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لَكَفُورٌ ٦٦

67. Ummad kasta waxaan u yeellay Hab Cibaado oy ku Cibaadaysan ee yeyna kugula Doodin Amarka (Xaqa) uguna yeedh Xagga Eebahaa Adigu waxaad ku Sugantahay Hanuun Toosane.

لكل أمة جعلنا منسكا هم ناسكوه فلا ينازعنك في الأمر وادع إلى ربك إنك لعلى هدى مستقيم ﴿٦٧﴾

68. Hadday kula Doodaan waxaad dhahdaa Eebaa Og waxaad Falaysaan.

وإن جادلوك فقل الله أعلم بما تعملون ﴿٦٨﴾

69. Eebana wuu kala Xugmin Dhexdooda Maalinta Qiyaame waxay isku Khilaafsanaayeen.

الله يحكم بينكم يوم القيامة فيما كنتم فيه تختلفون ﴿٦٩﴾

**Waxaa ku Tusin Qudrada Eebe iyo Awooddiisa Roobka Doogga soo Bixin, Dhulkana Cagaara oo Qurxiya, iyo Awooddiisa cirka iyo Dhulka iyo Hodanimadiisa. waxaa kale oo Tusin Ilaahnimadiisa Sakhiridda waxa Dhulka ku sugan iyo Doonta ku Socota Badda Amarka Eebe iyo inuu Cirka ka hayo inuu ku Dhaco Dhulka'waana u Naxariistaha Dadka, waana kan wax Nooleeya waxna Dila, hadana Nooleyn,Dadse waa Gaalimo Badane, Ummad kastana Eebe wuxuu u yeelay Cibaado ay Gudato ee yaan Xaqa lagugala Murmin, uguna yeedh Xaqa waxaad ku sugantahay Jid toosane, hadday kula Murmaanna Eebaa Og waxay fali isagaana kala Xukumi Dhexdooda Qiyaamada waxay isku Diidanyihiin. Saas darteed waa inaad Xaqa ku Toosnaato oon lagaa Leexin war Dad iyo Dhagartiisna maqlin si u kuugu Gargaaro Eebe una Liibaantid.** Al-Xajj (63-69).

---

70. Miyaadan Ogayn in Eebe Ogyahay waxa ku Sugan Samada iyo Dhulka, Arrintaasna waxay ku Sugantahay Kitaab, Arrintaasuna Eebe waa u Fududahay.

ألم تعلم أن الله يعلم ما في السماء والأرض إن ذلك في كتاب إن ذلك على الله يسير ﴿٧٠﴾

71. Waxay Caabudi Eebe ka sokow Wuxuusan u soo Dejini Xujo oyna u Lahayn cilmi, umana Sugna Daaliminta Gargaare.

ويعبدون من دون الله ما لم ينزل به سلطانا وما ليس لهم به علم وما للظالمين من نصير ﴿٧١﴾

72. Marka lagu Akhriyo korkooda Aayaadkanaga oo Cad cad waxaad ka Garataa Wajiyada kuwa Gaaloobay Diido,waxayna u Dhawyihiin inay ku Boodaan (Dhibaan) kuwa ku Akhrin Aayaadkanaga, waxaad Dhahdaa Maydiinka Warramaa wax ka Shar badan Taas, waa Naar u Darbay Eebe kuwa Gaaloobay, Iyadaana u Xun Meel Loo Ahaado.

وإذا تتلى عليهم آياتنا بينات تعرف في وجوه الذين كفروا المنكر يكادون يسطون بالذين يتلون عليهم آياتنا قل أفأنبئكم بشر من ذلكم النار وعدها الله الذين كفروا وبئس المصير ﴿٧٢﴾

73. Dadow waxaa layeelay Tusaale ee Dhagaysta, kuwaad Baryeysaan (Caabudaysaan) Eebe ka Sokow ma

يا أيها الناس ضرب مثل فاستمعوا له إن الذين تدعون من دون الله لن يخلقوا

Abuuraan Daqsi haba u Kulmeene, Hadduu ka Qaato Daqsi waxna kama Ceshadaan waxaa Tabar yar kan wax Dooni iyo kan la Dooni.

ذُبَابًا وَلَوِ ٱجْتَمَعُوا۟ لَهُۥ ۖ وَإِن يَسْلُبْهُمُ ٱلذُّبَابُ
شَيْـًٔا لَّا يَسْتَنقِذُوهُ مِنْهُ ۚ ضَعُفَ
ٱلطَّالِبُ وَٱلْمَطْلُوبُ ﴿٧٣﴾

74. Mayna Waynayn Eebe Mudnida Weynidiisa, Eebana waa Xoog Badane Adkaada.

مَا قَدَرُوا۟ ٱللَّهَ حَقَّ قَدْرِهِۦٓ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَقَوِىٌّ
عَزِيزٌ ﴿٧٤﴾

**Eebana waa Ogyahay waxa Cirka iyo Dhulka ku Sugan,wax walbana Kitaabay ku Suganyihiin,Eebana waa u Fududahay Xaalkaasu, mana Habboona in la Caabudo wax Eebe ka soo Hadhay oon waxba ahayn, wax Eebe wax uga Tarina ma jiro Daalimiinta, marka Xaq Diidayaasha lagu Akhriyo Aayaadka Eebe oo Cad Cad waxaad Aragtaa Wajiga Gaalada oo Diidan oo u Dhaw inay ku Boodaan Cidda Akhrin Aayaadka Eebe, waxaase Shar ku dhanyahay Naarta Eebe u Darbay kuwa Gaaloobay Iyadaana u Xun meel loo Ahaado, waxay Caabudi oo Eebe ka soo hadhayna ma Karaan Abuur Daqsi hadday kulmaan, hadduu wax ka qaatana kama Dhacsan karaan, Kan caabudi iyo Kan la Caabudiba waa Tabar yar Yihiin, mana waynayn Gaaladu Eebe Mudnaantiisa, waana Xoog badane Adkaada, cid la mid ah ama ka Dulmi badan oo ka Xun ma Jirto Cid Caabudday wax Eebe ka soo Hadhay.** Al-Xajj (70-74).

---

75. Eebe wuxuu ka Doortaa Malaa‘igta Rasuullo Dadkana (Rasuullo) Eebana waa Maqle Arka.

ٱللَّهُ يَصْطَفِى مِنَ ٱلْمَلَـٰٓئِكَةِ رُسُلًا
وَمِنَ ٱلنَّاسِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌۢ بَصِيرٌ ﴿٧٥﴾

76. Wuxuuna Ogyahay waxa Hortooda ah iyo waxa gadaashooda ah Xagga Eebaana loo Celin Umuuraha.

يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ ۗ
وَإِلَى ٱللَّهِ تُرْجَعُ ٱلْأُمُورُ ﴿٧٦﴾

77. kuwa (Xaqa) Rumeeyow Rukuuca oo Sujuuda oo Caabuda Eebihiin Falana Khayrka waxaad u Dhawdihiin inaad Liibaantaane.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱرْكَعُوا۟
وَٱسْجُدُوا۟ وَٱعْبُدُوا۟ رَبَّكُمْ وَٱفْعَلُوا۟ ٱلْخَيْرَ
لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ۩ ﴿٧٧﴾

78. kuna Dadaala dar Eebe Dadaal Dhab ah, Isagaana idin Doortay, mana yeelin Diinta Dhib, waa Milladdii Aabihiin Ibraahim, isagaana (Eebe) Idiinku Magacaabay Muslimiin horay iyo Quraankan si Rasuulku marag korkiinna ugu Noqdo, idinkuna aad Marag u ahaataan Dadka, ee Ooga Salaadda oo Bixiya Zakada oo Qabsada Eebe isagaa Gargaarihiina ah isagaana u Fii-

وَجَـٰهِدُوا۟ فِى ٱللَّهِ حَقَّ جِهَادِهِۦ ۚ هُوَ ٱجْتَبَىٰكُمْ
وَمَا جَعَلَ عَلَيْكُمْ فِى ٱلدِّينِ مِنْ حَرَجٍ ۚ مِّلَّةَ أَبِيكُمْ
إِبْرَٰهِيمَ ۚ هُوَ سَمَّىٰكُمُ ٱلْمُسْلِمِينَ مِن قَبْلُ
وَفِى هَـٰذَا لِيَكُونَ ٱلرَّسُولُ شَهِيدًا عَلَيْكُمْ
وَتَكُونُوا۟ شُهَدَآءَ عَلَى ٱلنَّاسِ ۚ فَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ
وَءَاتُوا۟ ٱلزَّكَوٰةَ وَٱعْتَصِمُوا۟ بِٱللَّهِ هُوَ مَوْلَىٰكُمْ ۖ

can Sayid isagaana u Fiican Gargaare.

فَنِعۡمَ ٱلۡمَوۡلَىٰ وَنِعۡمَ ٱلنَّصِيرُ ٧٨

Eebe isagaa Og Meejuu wax ka Diri iyo Cidduu Diri iyo Cidda loo Diriba, Siduu wax walba u Ogyahay. Tan kale wuxuu Fari Eebe in Salaadda la Oogo Eebana si Dhab ah loo Caabudo, Khayrkana la Falo si loo Liibaano, Dar Eebana loo Jahaado, Illeen Ilaahaybaa Dooray Ummaddan Muxamadiyadee, Dhibna ma Yeelin Diintii, waxay waafaqsantahay Diintii Nabi Ibraahim, Ilaahaybaana Muslimiin nagu Magacaabay mar hore, iyo Quraankaba.
Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Marag Buu noo yahay Ummadduna waa Maragga Dadka kale, waase in Salaadda la Oogo, Zakadana la Bixiyo, lana Qabsado Xadhigga Eebe, Illeen isagaa Sayidkeena iyo Gargaaraheenna ah una Wanaagsan gargaaree, waana Kaas Islaamka Toosan oo Wanaag, Islaanimo, Xumaan ka tagid iyo Samo fal ah, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Ruuxii u Yeedha Yeedhid Jaahiliyo wuxuu Dhex fadhiisan Jahannamo, Markaasuu Nin Yidhi Rasuulka Eebow Haba Soomo oo Tukado? Markaasuu Yidhi Haba soomo oo Tukado'u Yeedha Eebaha oo ah inuu idinku Magacaabay Muslimiin Addoomada Eebow.
Al-Xajj (75-78).

# Suurat Al-Mu'minuun سُورَةُ المُؤمِنُونَ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa Dhab ahaan u Liibaanay Mu'miniinta.

قَدۡ أَفۡلَحَ ٱلۡمُؤۡمِنُونَ ١

2. Ah kuwa Salaaddooda ku Khushuuca.

ٱلَّذِينَ هُمۡ فِي صَلَاتِهِمۡ خَٰشِعُونَ ٢

3. Oo ah kuwa Hadalka Macno Darro ka Jeedsada.

وَٱلَّذِينَ هُمۡ عَنِ ٱللَّغۡوِ مُعۡرِضُونَ ٣

4. Oo ah kuwa Fala Zakada «bixiya».

وَٱلَّذِينَ هُمۡ لِلزَّكَوٰةِ فَٰعِلُونَ ٤

5. Oo ah kuwa Furuujtooda Ilaaliya.

وَٱلَّذِينَ هُمۡ لِفُرُوجِهِمۡ حَٰفِظُونَ ٥

6. Haweenkooda iyo waxay Hanatay Gacantoodu mooyee, laguma Dagaalo Taas.

إِلَّا عَلَىٰٓ أَزۡوَٰجِهِمۡ أَوۡ مَا مَلَكَتۡ أَيۡمَٰنُهُمۡ
فَإِنَّهُمۡ غَيۡرُ مَلُومِينَ ٦

7. Ruuxiise Doona waxaas wax ka Soo Hadhay kuwaasu waa Xad Gudbayaal.

فَمَنِ ٱبۡتَغَىٰ وَرَآءَ ذَٰلِكَ فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡعَادُونَ ٧

8. Waa kuwa Ammaanadooda iyo Ballankooda Dhawra.

وَٱلَّذِينَ هُمۡ لِأَمَٰنَٰتِهِمۡ وَعَهۡدِهِمۡ رَٰعُونَ ٨

9. waana kuwa Salaadda Ilaaliya.

وَٱلَّذِينَ هُمۡ عَلَىٰ صَلَوَٰتِهِمۡ يُحَافِظُونَ ٩